

# FOOMKA OGOLAANSHAHA-U MUUJINTA KUWA KALE MAGACA IYO XOGTA QOFKA

(Fadlan daabac ama teeb ku qor laga reebo laynka saxeexa)

Magacaaga: \_\_\_\_\_

Magaca Dugsiga ama mac-hadyada kale Taasoo aad Ka soo Gudbisay Cabashaddan: \_\_\_\_\_

- Foomkani waxa uu ku waydiisanayaa haddii Xafiiska Xuquuqaha Madanigu (OCR) uu wadaagi karo magacaaga iyo xogta qofka ee kale marka OCR ay go'aansato samayta sidaasi in ay caawin doonto baadhitaanka xallinta cabashadda.
- Tusaale ahaan, in la go'aamiyo haddii dugsi uu qof takooray, OCR inta badan waxay u baahan tahay in ay u muujiso in magaca qofka iyo xogta kale ee qofku shaqaalaha dugsigaas si ay u xaqiijiyaan xaqiiqooyinka ama u helaan xog dheeraad ah. Marka OCR ay sidaa samayso, OCR waxay ku wargelisaa shaqaalaha in dhammaan qaababka aargoosiga qofka ku lidka ah iyo shakhsiyaadka kale ee la xidhiidhi qofka ay mamnuucyihiin. OCR waxaa dhihi karta sidoo kale in ay magaca qofka iyo xogta shakhsiyeed inta waraysigu jiro u muujiso markhaatiga iyo la talinta khabiirada.
- Haddii OCR aan loo ogolaan in ay muujiso magacaaga ama xogta shakhsiyeed sida lagu faahfaahiyay kor, OCR waxay go'aamin kartaa in ay xidho cabashaddaada haddii OCR ay go'aamiso in ay lama huraan tahay in la shaaciyay magacaaga ama xogta shakhsiyeed si loo xaliyo haddii dugsigu uu ku takooray adiga.

**OGOW:** Haddii aad cabasho u soo gudbisay OCR, OCR waxay u shaacin kartaa xog qaar ku saabsan cabashaddaada saxaafadda ama dad waynaha guud, iyaddoo ay ku jirto magaca dugsiga ama hay'ada; taariikhda la soo gudbiyay cabshaddaada; nooca takoorku uu yahay ee ku jira cabashaddaada; taariikhda cabashaddaada la xaliyay, la iska dhaafay ama la xidhay; sababaha go'aanka OCR; ama xogta kale ee la xidhiidha. Wixii xog ah OCR ay u shaaciso saxaafadda ama dad waynaha guud kuma jiri doono magacaagu ama magaca qofka kaas oo iyaddoo la metalayo la soo gudbiyay cabashadda.

**OGOW:** OCR waxay u baahantahay in ay ka jawaabto codsiyadeeda xogta. Guul daro in iskaashi lala sameeyo baadhitaanka OCR iyo hawlaha xallintu waxay keeni karaan xidhitaanka cabashaddaada.

## Fadlan saxeex A ma Qaybta B (laakiin labbadaba maya) oo ku soo celi OCR:

- Haddii aad u soo gudbisay cabashadda adoo naftaada metelaaya, waa in aad saxeexdaa foomkan.
- Haddii aad u soo gudbisay cabashadda adoo qof kaloo gaar ah metelaaya, qofka kale waa in uu saxeexaa foomkan.

**KA REEBAN:** Haddii cabashadda loo soo gudbiyaya iyaddoo la metalayo qof gaar ah oo ka yar 18 sano ama sharci ahaan qof wayn oo aan karti lahayn, foomkan waa in uu saxeexaa waalidka ama masuulka sharci ee qofkaas.

- Haddii aad u soo gudbisay cabashadda adoo matelaya nooc dad ah, oo aan ahayn qof gaar ah, waa in aad saxeexdaa foomka.

A. **Waxaan siinayaa OCR ogolaanshahayga si aan u muujiyo aqoonsigayga (iyo kaas ilmahayga yar/qofka masuulka laga yahay kaas oo anoo metelaya aan cabashadda u soo gudbiyay) kuwa kale ilaa baadhitaanka OCR oo dheeraad ah iyo hawlaha dhaqan gelinta.**

\_\_\_\_\_  
Saxeexa

\_\_\_\_\_  
Taariikh

**AM**  
**A**

B. **Ma siinaya OCR OCR ogolaanshahayga si aan u muujiyo aqoonsigayga (iyo kaas ilmahayga yar/qofka masuulka laga yahay kaas oo anoo metelaya aan cabashadda u soo gudbiyay) kuwa kale.** Waxaan fahansanahay in OCR ay dhici karto in ay xidho cabashaddayda.

\_\_\_\_\_  
Saxeexa

\_\_\_\_\_  
Taariikh

Waxaan caddaynayaa sida waafaqsan ciqaabta been abuurka lagu dhaartay in ay runtahay oo aysax tahay in aan ahay qofka kor lagu magacaabay; oo haddii la soo gudbiyo cabashadda iyaddo la metalayo ilmo yar/ qof masuul laga yahay, in aan ahay qofka waalidkiisa, ama masuulka sharci. Caddayntani waxay ku habboontay keliya aqoonsiga qofka oo mana sii gaadhsiisna wax ah sheegashada lagu soo gudbiyay cabashadda.